*Waad garan kartaa wixu laaxin ah ee ku jira. Haddiise lagu weydiiyo, «maxaad ku ogaatay laaxinka? Maxaad uga jeeddaa marka aad leedahay gabaygaasu waa jaban yahay»? Afka ayaad kala qaadaysaa. Maxaa jira, ma sahlana inaad si cilmi ah oo xisaab ku sargo'an u sharaxdid. Waxa ka horreysa baadhis, aad u ballaaran. Haddii anigu aan isku dayey inaan ogaado shuruudaha tirada badan ee maansadeenna xukuma, waxay igu qaadatay shan sannadood iyo bilo. Waana kuwan.

HABKA WAX-LOO MIISAAMO

Marka u horreysa waa inaynu isla garanaa inay erayadu ka kooban yihiin shaqallada iyo shibbanayaasha. Shaqallada ayaana dhawaaqa sameeya. Kolkaas, waa iyaga waxa miisaanka gabayga doorka weyn ka qaataa. Ila soco. Haddii aad dhowr bayd oo gabay ah ama hees ah isku daba qorto oo aad mid kastaba shaqalladii sa tirisid, waxaad arkaysaa xidhiidh u la yaab badan oo ka dhexeeya baydadkii, aad qortay. Haddaba, sidee baa shaqalladaas u tirinayaa? Sidee baa loo arkaa xidhiidhkaa aan ilmaamaynaan is-caddeeyo. Marka hore, shaqalku waa laba jaad, mid dheer iyo mid gaaban. Ka gaaban waxaad ka soo qaadaysaa hal (1), ka dheerna laba (2). Faas waxa micnaheedu yahay injiu, dhawaaq ahaan, shaqalka dheerinyahay labanlaab ka gaaban. Intaasi haddaynu garanay, waxa jira laba shibbane oo si gaar ah u dhaqma. Waxayna kala yihiin (W) iyo (Y). Labadaasi xaraf dhawaaq ahaan, mar kale ayaad u qiyaasaysaa «ow» iyo «aw».

MIISAANKA JIIFTADA

Innaga oo gogoldhiggaas madaxa ku hayna ayeynu halkaas ka ambaqaadeynaa. Maansooyinka kala geddisani waxay leeyihiin miisaanno kala geddisan. Hadda waxaynu ku bilaabaynaa jiiftada :

| 1 | B | 2 |
|---|---|---|
| 2,2 | | 22 |
| 2,11 | | 211 |
| 11,2 | 1 | 112 |
| 11,11 | | 1111 |

| 1 | T | 2 |
|---|---|---|
| 12,2 | | 22 |
| 21,2 | | 2 11 |
| 12,11 | 1 | 11 2 |
| 111,2 | | 11 11 |

Tusayaasha kor ku qeexan waxaynu arkaynaa inay jiiftadu u taallo laba qaab «B» iyo «T». Ka hore jiiftadu waa sagaallay — sagaal shaqal ayey ka koobantahay. Ka dambena waa tobanley. Shaqalka ku soo kordhay tobanleydu, wuxuu gelayaa sida kuu muuqata meeriska koowaad. Ma geli karo meeriska labaad. Midda kale haddaad dhugatid labada tuseba, waxaad arkaysaa in labada meeris «1» iyo «2» uu dhexdooda ku jiro



Xusuux.

1. Xaraf waliba god gaar ah ayuu gelayaa. Hase yeeshee, shaqalkii dheeriba wuxuu gelayaa laba god.

2. Xarafyada dh, sh, iyo kh, mid kastaaba wuxuu gelayaa hal god.

GUDUB.

1. Dad loo saaray dhexdhexaadis;
2. Gobol ka mid ah gobollada dalkeenna;
3. Dhul Isbaanishku xukumi jiray oo ku yiil koonfurta Marooko;
4. Xawaasteenna shanta ah ayuu ka mid yahay;
5. Magac nin;
7. Dhigaha ayaa lagu caseeyaa;
8. Shaqo-ka-nasasho;
14. Geed xeebaha ka baxa oo midhahiisa la cuno;
15. Dugsi hooy ahaan jiray oo ku yiil Gobolka Sanaag;
17. Umal;
20. Shir;
21. Macallin;
22. Dhac, xoog ku qaad.

HOOS

2. Silsilad buuro ah oo dhulkeenna ku taalla;
4. Saxaro;
6. Qaylo dheer;
7. Nooc ka mid ah xoolaha;
9. Gabay uu tiriyey Sayidkii;
10. Magac-u-yaal;
11. Nooc masaska ka mid ah;
12. Hilib;
13. Meel dhulka ah oo biyo ka soo baxayaan;
14. Cudur geela ku dhaca;
16. Kala-dhawaysi;
17. Codka ay xayawaanku sameeyaan;
18. Dhar, Maryo;
19. Faras aan qalabkiisii wadan;
22. Isha wiilkeeda;
23. Sanduuqyo ama shandado ay reer miyigu sameystaan oo ay alaabta ku qaataan;
24. Sooc, inta wacan goonni u saar;
25. Ka war qaba;
26. Mid;
27. Odayada ayaa cirrada ku casaysta.

dhurta ku jirtana — goonni ayey isu raacsan yihiin. Tusaalaha dambese, waxaad arkeysaa in 4ta shaqal ee hore, lababa goonni layskugu dhufanayo — iyadoo ay xundhurtu goonnideeda madi u tahay dhawaaq ahaan. Markaas si aynu u saxno laaxinka ku jira tusaalaha hore, waxaynu xundhurtii ka goynay shaqalkii lagu dhufanayey. Haddii aad tusayaasha fiirisidna, waxaad ku arkaysaa hakadyo (,) shaqallada kala qaybinaya. Waxay ku tusinayaan sida ay shaqalladu isugu xidhmayaan. Halkaasna waxaynu ka soo tuujinaynaa shardigii labaad ee jiiftada oo ah «shaqalladu iskama filiqsana. Waxay isu raacaan hab go'an».

SHARDIGA SADDEXAAD

Bal hadda ila soco oo tusaalahanna ilo fiiri.

1) b) Cabdi ma laha saaxiib yaan. Isaga tusaalaha 2) b, waxay labada shibbane ee «gg» ay ku dhex jiraan labada shaqal ee labaad. Waaney jaban tahay. Hase ahaatee tusaalaha 2) t, waxay labadii shibbane u riixmeen xundhurta iyo shaqalka ka dambeeya dhexdooda. Dhibaatana ku keenimayso. Halkaas waxaynu ka soo tuujineynaa shardigii saddexaad oo ah, «shibbanayaasha isxigsada ama labanlaabmaa meelo gaar ah ayey ku leeyihiin tusaha jiiftada — meel walba ma galaan».

Jiiftaduna waxay sax tahay haddii ay fuliso saddexdaa shardi dhammaantoodba. Waxaan ku soo gunaanadayaa jiiftada waxa hoos yimaada oo la miisaan ah heesta batarta iyo heesaha hadda raadiyaha laga qaado badankoodana — maan odhan dhammaantood.

Haa...., fari kama qodna, waa inoo toddobaadka dambe iyo qayb kale.

HALXIRAALIHII TODDOBAADKII HORE






Sabti, 24ka Jannaayo 1976 XIDDIGTA OKTOOBAR Bogga 3aad — Sannadkii 4aad — L. 2aad

# Toddobaadkan iyo suugaanta

Weli halkii ayey ka socotaa. Toddobaadkii hore waxaynu isla soo hadal-qaadnay gogoldhiggii miisaanka maansada. Waxaynu ka ambaqaadnay jiiftada iyo shardiyada xukuma habka ay u dhacayso.

Maantana waxaynu halkan ku soo qaadi doonnaa sheeko aad ula yaab badan haddii aad dhuuxdid jiiftada iyo heesaha ka mullaaxsama ama ka farcama, ka soo qaad:

| | | | |
|---|---|---|---|
| 2, 2<br>2, 11<br>11, 2<br>11, 11 | 1 | 22<br>2 11<br>11 2<br>11 11 | 1 |

Sida ka muuqata tusaalaha ker ku qeexan, waxaad aragtaa inuu yahay jiifto xagga dambe hal shaqal oo gaaban (1) laga raaciyey. Maxaa inoo soo baxaya. Way ka tegeysaa jiifto oo waxay noqonaysaa hees kale oo ay haweenku caahaha ku lulaan gugii. Bal fiiri:

Haantii qabooy qoor yar
2 2 (1) 2 2 (1)
Qoolaaligay baratay
2 2 (1) 1 1 (1)

Waxaad aragtaa in shaqalka u dambeeyaa uu yahay waxa ku soo kordhay jiiftadii caadiga ahayd ee aan toddobaadkii hore tifaftiray. Shaqalkaas oo innagu soo biiray wuxuu dhaliyey hees cusub oo hor leh. Isla miisaankan hees caanoodka waxa iyana hoos timaadda hees aynu carruurnimadii ku cayaari jirray oo ahayd:

Naa hooy dayooy hee dheh
2 2. (1) 2 2 (1)
Dayo Faaraxee hee dheh
1 1 2 (1) 2 2
Waa lay dilaayaaye
2 2 (1) 2 2 (1)
Waa lay dabaayaaye

2 2 (1) 2 2 (1)
Hay soo dhawaan dhoosay
2 2 (1) 2 2 (1)

Aan ka gudubno. Haddii aynu jiiftadii xagga dambe ka raacinno shaqal dheer (2), waxay noqonaysaa hees kale oo hor leh. Heestaasu waa heesta cawska lagu tidco, waa tan:

| | | | |
|---|---|---|---|
| 2, 2<br>11, 2<br>2, 11<br>11, 11 | 1 | 2 2<br>2 11<br>11 2<br>11 11 | 2 |

Cawskanow sabool diidow
2 1 2 (1) 2 2 (2)
Yaan suuqa lagu dhiginoo
2 2 (1) 1 1 1 1 (2)
Soddon lagugu baayicinoo
1 1 1 1 (1) 2 1 1 (2)
Yaa sameeyey lagu odhaneey
2 1 2 (1) 1 1 1 1 (2)

Runtii waa jiifto xagga dambe laga raaciyey shaqal dheer (2); kolkaana ku soo baxday hees cawgeed, haddaad shaqalkaas dheer (2) ee dambe ka gooysana, waxay noqonaysaa jiifto sagaallay iyo tobanlay iskuna jirta, sidaa oo kale:

Cawskanow sabool diid
2 1 2 (1) 2 2
Yaan suuqa lagu dhigin
2 2 (1) 1 1 1 1
Soddon lagugu baayicin
1 1 1 1 (1) 2 1 1
Yaa sameeyey lagu odhan
2 1 2 (1) 1 1 1 1

Hagaag. Bal sidan fiiri:

| | | |
|---|---|---|
| 2, 2<br>11, 2<br>2, 11<br>11, 11 | 1 | 21<br>111 |

Imminka jiiftadii waxba kumaynaan darin. Waxaynu samayney,

W. Q. MAXAMED XAASHI DHAMAC (GAARIYE)

## MIISAANKA MAANSADA

afartii shaqal ee xundhurta ka dambeysay ayeynu mid saarray. Taas waxay macnaheedu tahay jiiftadii ayeynu xagga dambe hal shaqal ka turray. Maxaa soo baxaya? Waxa soo baxaya hees kale:

Naa laago laago
2 2 (1) 2 1
Naa laan galoola
2 2 (1) 2 1
Oo weli la diiran
2 11 (1) 2 1
Naa may la diiran
2 1 (1) 2 1

Ka gudub oo sidanna fiiri:

| | | |
|---|---|---|
| 2, 2<br>11, 2<br>2, 11<br>11, 11 | 1 | 2<br>11 |

Waa tahay. Markii hore jiiftada waxaynu ku goynay hal shaqal xaggeeda dambe. Haatanna waxaynu ka goynaynaa laba shaqal xagga dambe. Bal tusaha fiiri. Heesta cusub ee soo baxaysaa hadda waxa weeye heestii caanka ahayd ee maqalaha:

Maqaleey warlaay
1 1 2 (1) 2
Ma laguu warramay
1 1 2 (1) 1 1

Dayib. Halkaas kuma dhammaan weli. shaqallada hadba mid baa la sii jari karaa inta xundhurta laga gaadhayo. Mar walbana waxaa kuu soo bixi karta hees jaad gooni ah. Hase ahaatee, halkaas ayaan toddobaadkan ku joojinayaa. Waxaad durba sii aragtaa xidhiidhka ka dhexeeya maansooyinka kala jaadka ah. Miyaanay wax la yaab leh ahayn? Mar kasta oo aad shaqal soo kordhiso ama dhinto waxaad ku turunturoonaysaa maanso cusub, maxaa qurux ku jirta afkeenna.

Fari kama qodna. Waa inoo toddobaadka dambe iyo qab kale.

## HALXIDHAAGII TODOBAADKAN



## HALXIDHAAGII HORE



## AQOON ISWEYDAARSI

MUQDISHO, Jan. (SONNA) — Xoghayaha Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa Jaalle Dr. Yuusuf Cali Cusmaan wuxuu uga furay xarunta Wasaaradda ee Muqdisho dood aqoon isweydaarsi ah Agaasimayaasha Waaxaha, Madaxda Mashaariicda iyo Isuduwayaasha Gobollada dalku ka kooban yahay oo dhan.

Dooddaas Aqoon isweydaarsiga ah oo socon doonta muddo saddex maalmood ah waxaa lagu falanqeyn doonaa hawshii ay Wasaaraddu soo qabatay sannadkii aynu soo dhaafnay ee 1975, wada dejinta barnaamijka ay Wasaaraddu damacsan tahay inay fuliso sannadkan cusub ee 1976 iyo iyadoo laga wada hadlo, lagana dhegeysto warbixinta ay soo bandhigaan Isuduwaayaasha gobollada doodatan.

Xoghayaha oo furitaankii doodaasi ka hadlay wuxuu sheegay inay dooddan oo ka duwan kuwii hore ay u yeelan jireen ay noqon do onto sida loo hirgeliyo go'aannada kasoo baxa, iyagoo tixgelinaya go'aannadii Shirweynahii lagu qabtay Golaha Ummadda. Xoghayuhu wuxuu halka ka caddeyay in ay jiraan shaqooyin aad u muhiim ah oo-la doonayo inay Wasaaraddu fuliso sannadkan, sida aawadeed-na la doonayo inay shaqaalaha Wasaaraddu ay xilweyn iska saaraan sidii ay u fulin lahaayeen hawshaa wadaniga ah ee ku soo food leh.

Xoghayuhu wuxuu madaxda uga warramay sida ay dadweynuhu ula socdaan ka faa'iideysiga xoolaha, iyo horumarinta dhirta iyo daaqa sidaa aawadeedna loo baahan